


Way fudud dahay sida loo akhriyo hagahan

PORTLAND

Maine June 2018 Primary Election

JUUN 12, 2018



What's inside:

- 2** Ku Saabsan Hagahan
- 3** Maxaad u Codaynaysaa?
- 4** Diiwaangelinta si aad u codbixiso
- 6** Xisbiyada Siyaadaha
- 8** Intaadan codayn ka hor
- 9** Goobta laga cod bixiyo
- 10** Xulashada doorashada codaynta
- 11** Warqadda Saamiga
- 13** Nidaamka dhakhsashada ee codaynta
- 14** Codadka Maqnaanshaha
- 16** Doorashooyinka koowaad
- 30** Su'aasha Codbixinta 1aad: Diidmada dadka ama veto



LEAGUE OF
WOMEN VOTERS®
OF MAINE
EDUCATION FUND

★ Ku Saabsan Hagahan



Doorka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine ee sanduuqa dhaqaalaha waxbarashada waxay aad ugu faraxsan yihiin inay qaybiyaan 30,000 nuqulo oo hagahan codbixiyaha bisha Juun 2018 ee doorashada koowaad.

Macluumaadkani waa kuwo aan ku saabsanayn xiriir siyaasadeed oo gooni ah. Taas macnaheedu waa ma aqbalno ama ma taageerno musharax kasta ama booska su'aalaha codbixinta.

Dhamaan qoraalada musharixiinta waxaa bixiya musharixiinta ma ay diyaarin doorka haweenka codbixiyayaasha iyo deeqaha waxbarashada ee Maine.

Ma jiraan hadalo musharaxa iyo su'aalaha codbixinta ay muujinayaan aragtiyada Ururka ama mid ka mid ah lamaanaheena qaybinta oo ay ka mid yihiin dugsiyada oo dhan, maktabadaha, ururada aan macaash doonka ahayn, ama hay'adaha.

★ Su'aalaha & Nuqulada Hagahan

Haddii aad su'aalo qabtid, soo wac 207-622-0256. x2 ama email noogu soo dir voterguide@lwvme.org.

Qoraalka waxaa laga helayaa www.lwvme.org.

★ Maxaad u Codaynaysaa?

★ Maxaad u Codaynaysaa?

Waxaad ka caawin kartaa in la sameeyso isbedelo muhiim ah habka magaalada, gobolka, iyo sida uu wadankaagu u socdaan.

★ Codayntaydu qarsoodi matahay?

Haa, codkaagu waa qarsoodi. Qofna ma ogaanayo sida aad u codeyneyso haddii aadan cid u sheegin.

★ Yaa Codayn Kara?

Waa inaad marka hore is diiwaan gelisid si aad u cod bixiso.

Waad codaynkartaa gobolka Maine hadii aad:

- Hadii aad tahay muwaadin dalka Maraykanka
- Aad degentahay gobolka Maine
- Da'daadu tahay 18 jir ama kaweyn tahay

Waad codaynkartaa doorashooyinka aasaasiga ah ee bisha Juun 12 keeda hadii aad 17 jir tahay aad na noqon doonto 18 jir bisha Noofambar 6, 2018.

★ Maxaan u Codaynayaa?

Waxaad ka codeyneysaa hal su'aal oo cod bixin ah:

- Aftida dadka oo vito ah

Waxa kale oo aad heli kartaa warqad codbixin gooni ah ee doorashooyinka koowaad.

• Doorashada koowaad codbixiyayaasha Maine ayaa dooranaya cida mataleysa xisbigooda doorashooyinka guud ee bisha Noofambar.

• Waxaa jira afar xisbi gobalka Maine, xisbiga Dimuquraadiga, xisbiga Green, xisbiga Madaxa banaan, xisbiga Libertarian iyo xisbiga Jamhuuriyada.

• Haddii aad rabto in aad ka codeyso doorashada hore ee Dimuquraadiga, Libertarian, ama Jamhuuriyada, waa inaad ku biirtid mid ka mid ah xisbiyadaas.

• Waxaad codkaaga ka dhiiban kartaa Green ama xisbiga madaxa banana hadii aad xubin katahay xisbiyadaas. Codkaaga waad dhiiban kartaa adigoo aan xubin ka ahayn xisbi kale.

Sanadkan, xisbiyada Jamhuuriyadaha iyo Dimuquraadiyiinta ayaa haysta doorashooyin hor leh oo leh tiro ka badan hal musharax. Waxaa la yiraahdaa tartanka hore. Xubnaha xisbiyada siyaasadeed waxay dooran doonaan musharixiintooda:

- Gudoomiyaha Gobolka Maine
- Senetor Maraykanka
- Wakiilka Maraykanka
- Xildhibaanada Dawlada
- Xafiisyada Gobolka

★ Waa Goorma Doorashadu?

Maalinta doorashadu waa Juun 12, 2018

★ Diiwaangelinta si aad u codbixiso

★ Sideebaan Isu diiwaangelin karaa?

Waxaad iska diiwaan gelin kartaa inaad ka codeyso Gobolka Maine haddii aad:

- 18 jir muwaadin maraykan ah, degena gobolka Maine.
- 17 jir muwaadin maraykan ah noqon doona 18 jir maalinta doorashada Noofambar 6, 2018. Waxaad sidoo kale codbixin u diri kartaa musharixiinta doorashada hore ee bisha June. Laguuma ogolaan doono inaad codeyso su'aasha cod bixinta haddii aadan 18 jir ahayn bisha Juun 12.
- Haddii dembiile aad tahay oo aad xabsi kujirtid. Aad ka diiwaan geshay magaalada aad degan tahay intaan lagu xirin kahor aadna codkaaga ka dhiibankarto adoo isticmaalaya warqada codbixinta maqnaanshaha.
- Guri la'aan

★ Waxaad iska diiwaan gelin kartaa Maine si aad u codeyso doorashada 12-ka June:

- Boostada. Waa in ay diiwaan gelintaadu gaadho xafiiska magaalada aad degentahay maalinta Talaadada Maayo 22, 2018.
- Xogta diiwaan gelinta maalinta Talaadada Maayo 15, 2018.
- Xafiiska diiwaan gelinta gaadiidka Maayo 9, 2018.
- Wakhti kasta waad tegi kartaa xafiiska magaalada laga xukumo ilaa iyo maalinta doorashada.
- Xogta aad codkaaga ka dhiibato maalinta doorasha.

★ Waa inaad buuxiso kaadhka diiwaan gelinta ee cod bixinta

Waa inaad buuxiso kaadhka xaga hore iyo xaga dambe:

- Saxeex kaadhka kuna qor taariikhda
- Uma baahnid inaad ku biirtid xisbi si aad u codeysid su'aasha codbixinta. Haddii aadan rabin inaad ku biirto xisbi, haku qorin kaarka diiwaangelinta.
- Waa inaad xubin ka tahay xisbi si aad u codayso doorashada koowaad ee xisbigaas.
- Wixii faah faahin ah booqo bogan: <http://www.maine.gov/sos/cec/elec/voter-info/voterguide.html>

★ **Kaadhka codbixinta ee diiwaan gelinta**

★ **Kani waa tusaale sida uu u eg yahay kaadhka codbixinta ee diiwaan gelinta**

MAINE VOTER REGISTRATION APPLICATION			PARTY AFFILIATION
Federally required questions:			☐ Democratic ☐ Green Independent ☐ Libertarian ☐ Republican ☐ Other qualifying party: _____ ☐ Unenrolled (no party choice)
♦ Are you a citizen of the United States of America? ☐ YES ☐ NO ♦ Will you be 18 years of age on or before Election Day? ☐ YES ☐ NO			
If you checked "no" in response to either of these questions, do not complete this form. You must be a U.S. citizen in order to vote.			
LAST NAME	FIRST NAME	MIDDLE NAME	DATE OF BIRTH _ / _ / ____ M M D D Y Y Y Y
CURRENT RESIDENCE ADDRESS (Physical address where you live)			
STREET NAME AND NUMBER, <u>NOT</u> A P.O. BOX		CITY, TOWN, PLANTATION OR TOWNSHIP	
CURRENT MAILING ADDRESS (Complete if different from above address)			
STREET NAME AND NUMBER, OR P.O. BOX, etc.		CITY/TOWN	ZIP CODE
Have you previously been registered to vote? ☐ YES ☐ NO If the answer is "yes" provide address of previous registration below.			TELEPHONE (Optional)
CITY/TOWN	COUNTY	STATE	
COMPLETE BOTH SIDES OF THIS CARD - PLEASE PRINT			

MAINE VOTER REGISTRATION APPLICATION - COMPLETE BOTH SIDES OF THIS CARD -	
CHANGE OF NAME (Prior legal name, if applicable) LAST FIRST MIDDLE SIGN AND DATE THIS CARD. I certify that all the information I have provided on this form is true. Signature of Applicant on line above Date on line above	VOTER ID: By federal law, NEW Maine voters must provide an applicable ID number as follows: 1. Your <u>Maine</u> driver's license/ <u>Maine</u> State ID; or 2. The last 4 digits of your Social Security number (ONLY if you don't have a <u>Maine</u> driver's license/ <u>Maine</u> State ID); or 3. Write "none" ONLY if you don't have either 1 or 2. _ _ _ _ _
REGISTRAR'S USE ONLY: Date Received: _____ Ward-Precinct: _____ - _____ Source of Registration: ☐ In Person ☐ By Mail ☐ Agency ☐ BMV ☐ Voter Registration Drive/3 rd Person Type of Registration: ☐ <u>NEW Maine Voter Registration</u> Form of Proof for ID: _____ for Residency: _____ ☐ <u>Change of Existing Voter Registration</u> (check boxes below) Form of Proof for Residency: _____ ☐ Address Change to new municipality ☐ Address Change within municipality ☐ Party Enrollment Change ☐ Name Change ☐ Other Change _____ ☐ <u>Duplicate Application</u> (no changes made)	
INSTRUCTIONS TO VOTERS: Failure to complete this entire application may prevent registration. - Deliver or mail this completed card to your municipal registrar or to the Division of Elections: #101 State House Station, Augusta, ME 04333-0101. This properly completed application must be received by the municipal registrar 21 days or more before an election. If less than 21 days before an election, you must register in person. If you are a NEW Maine voter and mail this card, you must include a photocopy of your Maine driver's license, Maine State ID, or current utility bill, bank statement or government document that shows your name and address. - For election information, call 207-624-7650 or visit www.maine.gov/sos/cec/elec/ (rev. 01/17)	

★ Xisbiyada Siyaadaha

★ Waa maxay Xisbiyada Siyaasadahu?

Xisbi siyaasadeedku waa dad wadaaga fikrado isku mid ah oo ku saabsan sida ay dawladu u shaqeyneyso.

Markaad is diiwaan geliso, waxaad ku biiri kartaa xisbigaad rabto. Waa lacag la'aan. Waxaad sidoo kale bedeli kartaa diiwaangelinta xisbiga.

Tusaalooyinka xisbiyada siyaasadaha waxaa ka mid ah: Dimuquraadi, Green, Madaxa Banaan, Libertarian, iyo Jamhuuriyada.

★ Maxaad u dooranaysaa xisbi siyaasadeed?

Hadii aad rabto in aad ka codeyso doorashada koowaad, waa inaad doorataa mid ka mid ah xisbiyada siyaasadeed. Sanadkan, kaliya Jamhuuriyadaha iyo Dimuqraadiyiinta ayaa haysta doorashooyin hor leh oo leh tiro ka badan hal musharax. Tani waxaa la yiraahdaa maadada tartanka.

★ Ka mid noqoshada xisbi siyaasadeed

Waa inaad ku biirtaa xisbi si aad ugu codayso doorashada hore ee xisbigaas.

- Ku biir xisbi siyaasadeed adoo isticmaalaya kaarka diiwaangelinta.
- Haddii aadan ka tirsaneyn xisbi, waxaad ku biiri kartaa xisbi kasta xataa maalinta doorashada.
- Waa inaad ugu yaraan ku jirtid xisbiga 3 bilood.
- Haddii aad hore ugu jirtay xisbi kale, waad bedeli kartaa xisbiga aad ka tirsan tahay. Waa inaad bedeshid ugu yaraan 15 maalmood ka hor doorashada.
- Maalinta ugu dambeysa ee la bedeli karo xisbiyada doorashooyinka waa June 12-keeda wuxuu noqon doonaa Jimcaha, May 25, 2018.
- Uma baahnid inaad ku biirtid xisbi si aad u codeyso su'aalaha codbixinta.

★ Xisbiyada Siyaadaha

★ Maxay u taaganyihiin xisbiyada siyaasadeed ee Maine?

Hadaladan waxaa soo gudbiyey xisbiyada siyaasada.

Xisbiga Dimuquraadiga ee Maine

“Dawladu waa inay u wada shaqayso dadka ku nool gobolka Maine. Qof walba waa inuu gaadho horumar, qiimo ayay noo leedahay shaqadaan qabano. Waxaan u dagaalanaa daryeelka caafimaadka qof walba, iskuulo wanaagsan meel walba iyo dhaqaale u wada shaqeeya dadka degan Maine.”

Mudnaanta ugu Saraysa:

1. Reer Maine inay helaan Shaqooyin joogto ah
2. Isbedelka cimilada
3. Cadaalada bulshada

MaineDems.org

207-622-6233

Xisbiga Madaxa banaan ee Maine

“Dhamaan hawsha ay qabtaan xisbigamadaxa banaan waxay ku salaysan tahay tobon qodob oo muhiim ah: Cadaalad ku salaysan dimuquraadiyad, Cadaalada bulshada iyo fursado loo wada siman yahay, Xirfadaha noolayaasha dabiiciga ah, Dhibaato la’aan, Awood baahinta bulshada, Dhaqaale ku salaysan bulshada iyo cadaalada dhaqaalaha, Sinaanta bulshada, Ixtiraamka kala duwanaanshaha, Mas’uuliyadaada shakhsiyeed iyo tan caalamka; iyo Feejignaanta horumarka mustaqbalka.”

Mudnaanta ugu Saraysa:

1. Shaqooyin joogta ah dadka reer Maine.
2. Isbedelka Cimilada.
3. Cadaalada Bulshada.

MaineGreens.org

207-200-6447

Xisbiga Libetarianka ee Maine

“Waxaan qabnaa in dhamaan sakhshiyaadka ay xaq u leeyihiin inay ku dhaqmaan xukunka keligood ah ee naftooda u gaarka ah waxayna xaq u leeyihiin inay ku noolaadaan qaab kasta oo ay doortaan, aysan si khasab ah u faragelin xuquuqda dadka kale.”

Mudnaanta ugu Saraysa:

1. Xaq u lahaanshaha noloshaada, waxaan kasoo hor jeednaa isu xoog sheegista dadka kale.
2. Xaqa xoriyada, hadalka iyo ficilka
3. Xaq u lahaanshada hantida, waxaan ka soo hor jeednaa dhamaan fara gelinta dawlada ee hantida gaarka ah

LPME.org

207-518-7493

Xisbiga Jamhuuriga ee Maine

“Xisbiga Jamhuuriga Maine wuxuu u heelan yahay xoriyada shakhsiyada; xoriyada diinta; canshuur hoose oo cadaalad ah; sinaanta dadka oo dhan; dawlad la awoodi karo; xoojinta qoysaska iyo beelaha; ilaalinta Dastuurka; iyo nabadgelyada dadka Maraykanka.”

Mudnaanta ugu Saraysa:

1. Shaqo abuurista, kobcinta dhaqaalaha, iyo kor u qaadista dhaqaalaha.
2. Ilaalinta amniga iyo amaanka.
3. Xoriyada shakhsiga iyo xoriyada diinta.

MaineGOP.org

207-622-6247

★ Intaadan codayn ka hor

★ Xagee Ayaan ka cod bixin karaa?

Si aad u ogaato Meesha aad ka codayn karto:

- Waxaad aadaa xafiiska laga maamulo magaalada aad degan tahay
- Booqo bogan: http://www.maine.gov/portal/government/edemocracy/voter_lookup.php
- Codbixinta adigoo ka maqan

★ Wakhtigee ayaan codayn karaa?

Goobaha codbixintu waxay furan yihiin inta u dhaxaysa 6:00 subaxnimo ilaa 10:00 subaxnimo maalinta doorashada. Wakhtiga la furayo goobaha lagu codbiyo isku mid ma wada aha magaalooyinka. La xiriir karaaniga magaaladaada hadii aad su'aalo qabto.

Dhamaan goobaha cod bixinta waxaa la xirayaa 8:00 habeenimo.

★ Sideen uga fogaan karaa dadka faraha badan?

Meelaha lagu cod bixiyo waxay u muuqdaan in ay dadku ku yarhiin saacadaha 10:00 subaxnimo ilaa 11:30 subaxnimo, iyo 1:30 galabnimo ilaa 3:30 galabnimo.

★ Maxaa dhici kara hadii uu magacaygu uu ku jirin liiska meesha laga cod bixinayo?

- Karaaniga doorashada ayaa ku caawin doona
- Waxaa laga yaabaa inaad is diiwaan gelisid si aad u codaysid.
- Haddii aad rabto inaad ka codeyso doorashada koowaad, waa inaad ku biirto xisbi.
- Waxaa laguuri diri karaa goob kale oo codbixin ah.
- Haddii dhibaataadaada aan lagu xallin, weydiiso inaad codeyso warqad doorasho oo adag. Codkaaga waa laguuri xisaabin doona maalinta doorashada. Dhibaataadaada waxa laguuri xalin karaa mar dambe.

★ Miyaan u baahanahay kaadhka aqoonsiga?

Waa inaad soo qaadatid kaadhka aqoonsiga iyo cadayn cinwaanka gurigaad degen tahay (tusaale waxaa ah, leesanka baabuurka iyo biilka korontada).

- Waxaad tahay qof codaynaya markii kuugu horeysay
- Waad ka guurtay meeshaad deganayd
- Waxaad u baahan tahay inaad is diiwaangaliso si aad u codeyso maalinta doorashada.
- Waxaad u baahan tahay inaad ku biirto xisbi maalinta doorashada.

Haka wel welin in lagu celiyo hadaad tahay qof codayn kara.

★ Goobta laga cod bixiyo

★ Maxaan samayn doonaa markaan tago goobta codaynta?

- Iska diiwaan geli karaaniga jooga goobta cod bixinta
- Liiska ayaad ku jirtaa hadii aad hore isu diiwaan gelisay si aad u codaysid
- U sheeg karraaniga doorashada hadii aad rabto warqad doorasho.
- Karaaniga doorashada ayaa ku siin doona warqadaha doorashada
- Warqada doorashada waa warqad aad ku calaamadeyn doonto doorashada codkaaga
- Waxaad geli doontaa qol ugaar ah cod bixinta si aad codkaaga aad u dhibato.
- Markaad dhamaysato, waxaad ku ridaa codbixintaada sanduuqa codka ama mashiinka.

★ Maxaan samayn karaa hadii aan u baahdo caawimo marka aan codaynayo?

Waxaad weydiisan kartaa caawimo iyo wixii suaalo ah ee aad qabto karaaniga goobta doorasha jooga. Karaaniyadu waxay kaa caawin karaan sidii aad u buuxin lahayis warqada doorashada, waxay ku siin doonaan hadii aad u baahato warqad cusub. Ma noqon doontid qofka keliya ee su'aalo qaba.

★ Sidee baan u buuxin doonaa warqada doorashada?

- Warqada codbixinta ayaad ka arki doontaa si aad u xuluto qofka aad dooranaysid.
- Doorasha koowaad ee June waxaad isticmaali doontaa doorashooyinka xulashada qaar ka mid ah musharixiinta.

Waxaad dooran kartaa inta musharax ama musharixiin ee aad rabto

- Hadii aad qabto su'aal, weydii karaaniga doorashada
- Uma baahnid inaad ka codayso wax walba oo waraaqda ku qoran, waxaa keliya oo lagu tirin doonaa waxyaabaha aad ka cod dhiibatay
- Hubi cod bixin taada
- Hadii aad khalad sameysid, waxaad codsan kartaa warqad cusub

★ Maxaa dhacaya hadii aan akhrin karin warqada cod bixinta?

- Waxaad heli kartaa caawimo
- Saaxiib ama qaraabo ayaa ku caawin kara. Qofka ku caawinaya uma baahna inuu noqdo cod-bixiye ama qof gaaray da'da lagu cod bixiyo.
- Shaqaalaha doorashada ayaa kaa caawin kara codbixintaada.
- Qofka aad u shaqeyso ama sarkaalka midowga kaama caawin karaan inaad codkaaga dhiibato.
- Mishiin gaar ah ayaa diyaar ah haddii aad rabto inaad aragto warqad balaaran oo daabacan ama maqal ahaan warqada codbixinta (adiga oo eegaya bogga 14).

★ Xulashada doorashada codaynta

★ Xulashada doorashadu waxay dadka u ogolaanaysaa inay kala doortaan musharixiinta.

★ Sidee bay u shaqaysaa xulshada doorashadu?

- Codbixiyayaashu waxay dooran karaan musharaxiinta sida ay u kala jecelyihiin: Doorashada 1aad, Doorashada 2aad, Doorashada 3aad, iyo wixii la mid ah.
- Marka codadka oo dhan la tiriyo, haddii mid ka mid ah musharaxiinta uu helo wax ka badan 50% codadka ugu horeeya, wuu ku guuleysanayaa ama wey ku guuleysanaysaa
- Haddii musharaxiintu aysan helin wax ka badan 50% codadka koowaad ee doorashada, musharaxa ugu hooseeya ma guuleysan doono.
- Codbixiyayaasha musharaxoodu uusan ku guuleysan doorasha koowaad, codkooda waa loo xisaabindoona doorashada labaad.
- Ku celceli ilaa iyo inta ay kasoo haraan laba musharax oo keliya. Qofka hela codadka ugu badan marka ugu dambaysa ayaa ku guulaysan doona doorashada.

★ Waa maxay sababta aan u kala dooranayo codkayga?

- Haddii doorashadaada koowaad lagu jebiyo musharaxaaga, waa lagu tirin doonaa codkaaga iyo xulashadaada ugu sareysa.
- Waxyeelo dhibaato ah uma imaan karto musharaxaaga aad rabto inaad siiso codkaaga koowaad haddii aad musharaxyada kale aad dooratid 2aad, 3aad, iyo wixii la mid ah.
- Kama caawin kartid musharaxa aad jeceshahay in ladoorto adigoo rafcaan ka ah hal musharax. Doorashadaada kowaad waa lagu tirinayaa mar walba haddii musharaxa aad jeceshahay aan laga cod badin.

★ Sidee baan uga fogaan karaa khaladaadka codbixinta?

- Calaamadee goobaabinta sida ay isugu xigaan
- Calaamadee goobaaninta sida ay u kala horeeyaan
- U kala xulo musharixiinta sidaad adigu rabto
- Uma baahnid inaad u codayso musharax aanad taageereyn.
- Haddii aad khalad sameyso, waydiiso karaaniga warqad codbixin oo cusub.
- Weydiiso caawimaad. Ma noqon doontid qofka kaliya ee su'aalo qaba.

★ Xulashada doorashada codaynta

★ **Xulashada doorashada codaynta, Xisbiga Dimuquraadiga**

State of Maine Sample Ballot Democratic Primary Election, June 12, 2018 for

Instructions to Voters

To vote, fill in the oval like this 

To rank your candidate choices, fill in the oval:

- In the 1st column for your 1st choice candidate.
- In the 2nd column for your 2nd choice candidate, and so on.

Continue until you have ranked as many or as few candidates as you like.

Fill in no more than one oval for each candidate or column.

To rank a write-in candidate, write the person's name in the write-in space and fill in the oval for the ranking of your choice.

Governor	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	4th Choice	5th Choice	6th Choice	7th Choice	8th Choice
Cote, Adam Roland Sanford	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Dion, Donna J. Biddeford	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Dion, Mark N. Portland	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Eves, Mark W. North Berwick	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Mills, Janet T. Farmington	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Russell, Diane Marie Portland	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Sweet, Elizabeth A. Hallowell	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐
Write-in	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐	☐

Turn Over for Additional Contests

★ Xulashada doorashada codaynta

★ **Xulashada doorashada codaynta, Xisbiga Jamhuuriga**

State of Maine Sample Ballot

Republican Primary Election, June 12, 2018

for

Instructions to Voters

To vote, fill in the oval like this

To rank your candidate choices, fill in the oval:

- In the 1st column for your 1st choice candidate.
- In the 2nd column for your 2nd choice candidate, and so on.

Continue until you have ranked as many or as few candidates as you like.

Fill in no more than one oval for each candidate or column.

To rank a write-in candidate, write the person's name in the write-in space and fill in the oval for the ranking of your choice.

Governor	1st Choice	2nd Choice	3rd Choice	4th Choice	5th Choice
Fredette, Kenneth Wade Newport	☐	☐	☐	☐	☐
Mason, Garrett Paul Lisbon	☐	☐	☐	☐	☐
Mayhew, Mary C. China	☐	☐	☐	☐	☐
Moody, Shawn H. Gorham	☐	☐	☐	☐	☐
Write-in	☐	☐	☐	☐	☐

Turn Over for Additional Contests

★ Nidaamka dhakhsashada ee codaynta

★ Waa maxay nidaamka dhakhsashada codayntu?

Nidaamka dhakhsashada ee codbixintu waa qalab wax lagu qoro loona isticmaali karo si ay kaaga caawiso inaad akhriso ama aad u buuxiso codbixintaada.

★ Miyaan isticmaali karaa nidaamka dhakhsada ah ee goobta codbixinta?

U sheeg karaaniga doorashada goobtaada codbixinta inaad isticmaasho nidaamka codaynta ee dhakhsaha ah.

★ Sidee buu u shaqeeyaa nidaamka dhakhsada ah ee loo codayo?


- Nidaamka dhakhsashada ee codayntu waxay leedahay shaashad muuqaal ama fiidiyow aad ku qori karto codbixin taada.
- Warqada codbixinta waxaa lagu arki karaa daabacaad balaaran.
- Warqada codbixinta oo cod ah ayaad heli kartaa iyo qalabka lagu dhegaysto

★ Waxaad samayn kartaa xulashooyinka adigoo:

- Taabanaya shaashada
- Isticmaalida rikoodhada lehna badhamada midabada leh iyo qoraalada loogu talagalay dadka indhaha la.
- Xulashada (Haa) cagaaran ama (Maya) casaan adigoo isticmaalaya bedel.
- Markaad dhamaysato, nidaamku wuxuu sawir ka bixinayaa warqada codbixinta ee aad dooratay.
- Waxaad ku ridaa codkaaga sanduuqa codka ama mashiinka.

Wixii faah faahin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka codbixinta dhakhsashada booqo:

<http://www.maine.gov/sos/cec/elec/voter-info/accessiblevoting.html>



Nidaamka dhakhsashada ee codbixintu waa qalab wax lagu qoro loona isticmaali karo si ay kaaga caawiso inaad akhriso ama aad u buuxiso codbixintaada.

★ Codadka Maqnaanshaha

★ Waa maxay codaynta maqnaanshuhu?

Waxaad isticmaali kartaa codaynta maqan si aad ugu codayso adoo gurigaaga jooga, xafiiska magaaladaada ka hor maalinta doorashada.

Hadii aad ka diiwaan gashan tahay inaad codkaaga dhiibato, waxaad codsan kartaa cod bixinta maqnaanshaha. Waa inaad sidaas sameysid maalinta khamiista kahor maalinta doorashada ee Juun 7, 2018.

★ Sidee baan u heli karaa warqada doorashada ee maqnaanshaha?

- Kadib markaad buuxiso warqada codsiga oo aad soo celiso, waxaa lagu soo diri doonaa warqada cod bixinta ee maqnaanshaha.

- Uma baahnid sabab aad ku codsato cod bixinta maqnaanshaha.

- Ka codso warqada ka maqnaanshaha magaaladaada. Ama ka codso warqadda cod bixinta maqnaanshaha ee qaybta doorashada bogan: <http://www.maine.gov/cgi-bin/online/AbsenteeBallot/index.pl>

- Waad heli kartaa warqada doorashada ee maqnaanshaha 30 maalmood ka hor maalinta doorashada

- Waxaad codsan kartaa cod bixinta maqnaanshaha waqti kasta illaa iyo Juun 7, 2018.

- Waxa kale oo u codsan kartaa qof kamid ah qoyskaaga warqada codbixinta maqnaanshaha. Xafiiska karaaniga magaalada ayaa kuu sheegi doona qofka loo tixgeliyo inuu yahay xubin qoyskaaga ka tirsan.

★ Maxaan ku sameeyaa warqada cod bixinta maqnaanshaha?

- Buuxi warqada doorashada, xusuuso, uma baahnid inaad u codeyso su'aal kasta. Waa caadi hadii aad ka jawaabin su'aalaha qaarkood.

- Boostada dhig cod bixintaada ama udhiib karaaniga xafiiska doorashada ee magaaladaada. Codadka waa in la helaa 8:00 habeenimo maalinta doorashada.

★ Sideen u codsan karaa cod bixinta maqnaanshaha kadib maalinta Khamiista ka horna maalinta doorashada?

Way adag tahay in la helo warqada cod bixinta ka dib maalinta Khamiista ka hor maalinta doorashada Juun 7, 2018.

Waxaad heli kartaa warqada cod bixinta maqnaanshaha hadii:

- Aad ka baxdid magaaladaada maalinta doorashada arin lama filaan ah awgeed.

- Aad tahay qof naafo ah

- Aad ku nooshahay jasiirad aadna awoodin inaad tagto goobta codbixinta maalinta doorashada.

- Aad xanuunsan tahay aadna banaanka u bixi karayn

Karaaniga xafiiska codbixintu waa inuu helaa warqada codbixintaada maqnaanshaha 8:00 habeenimo maalinta doorashada.

★ Wixii Faah faahin ah

★ Sideen u heli karaa karaaniga magaalada?

Waxaad ka helaysaa macluumaadka ugu dambeeyey barta internetka ee magaaladaada.

Waxaa kale oo aad ka heli kartaa cinwaanka iyo taleefan lambarka karaaniga magaaladaada:

<http://www.maine.gov/sos/cec/elec/munic.html>

Waxaad kale ood la xiriiri kartaa:

Office of the Secretary of State

Division of Elections

101 State House Station

Augusta, ME 04333-0101

Telefoonka: 207-624-7650

Email: cec.elections@maine.gov

Website: maine.gov/sos/

★ Sidee baan u arki karaa warqada codbixinta ka hor doorashada?

Waxaad ka arki kartaa warqada codbixinta siday u eg tahay bogan hoos ku xusan:

<http://www.maine.gov/sos/cec/elec/upcoming/rcv.html>

★ Wixi faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan su'aasha cod-bixinta

Booqo hagaha muwaadiniinta ee doorashada:

<http://www.maine.gov/sos/cec/elec/upcoming/>

★ Doorashooyinka koowaad

12ka bisha Juun ee doorashooyinka hore, xubnaha xisbiyada siyaasadu waxay u codeeyaan inay go'aan ka gaaraan musharixiintooda doorashooyinka guud ee bisha November.

Musharixiinta aan is diiwaan gelin kama qaybgeli karaan doorashooyinka koowaad. Musharixiinta aan is diiwaan gelin ayaa laga yaabaa inay ka muuqdaan codbixinta doorashooyinka guud ee bisha November.

- ★ **Gudoomiyaha Gobolka** – *Pages 17-20*
- ★ **Senatarka Maraykanka** – *Page 21*
- ★ **Xubin ka tirsan Golaha Wakiilka ee Maraykanka** – *Pages 22-23*
- ★ **Senator-ka Gobolka** – *Page 24*
- ★ **Wakiilka Gobolka** – *Pages 25-27*
- ★ **Qareenka Degmada: Degmada Cumberland** – *Page 28*
- ★ **Garsoore Probate: Degmada Cumberland** – *Page 29*

★ Gudoomiyaha Gobolka

Gudoomiyaha gobolku wuxuu fuliyaa shuruucda gobolka u degsan, wuxuu doortaa dadka si ay u maamulaan hay'adaha dawlada, waxay kaloo magacaabaan garsoorayaasha maxkamadaha.

Gudoomiyuhu wuxuu soo jeedin karaa sharciyo cusub. Isaga ama iyada ayaa diidi kara sharci uu sharcigu ogolaado. Veto waxa loola jeedaa in gudoomiyaha gobolka uu rabo inuu joojiyo sharcigani inuu noqdo sharci. Sadex meelood laba (2/3) sharci-dejiyayaasha ayaa ku qasbi kara sharci-dajinta inuu noqdo sharci xataa hadii gudoomiyuhu hirgeliyo sharcigaas.

Gudoomiyaha gobolka waxaa la doortaa afartii sano mar. Codbixiyayaashu waxay dooran karaan Gudoomiye laba jeer ama wadar ahaan sideed sano. Qofku waa inuu 30 jir yahay si uu u noqdo Gudoomiye. Isaga ama iyadu waa inay yahay muwaadin ugu yaraan 15 sano. Isaga ama iyadu waa inay ku nool yihiin gobolka Maine ugu yaraan shan sano.

Mudada (sanadaha adeega): 4 sano

Mushahaarada: \$70,000

★ Musharaxiinta Dimuqraadiga



Xulashada doorashada codaynta



Adam Cote

"Aragtidayda hogaamintaydu waa mid ballaadhan oo ka kooban 17 sano oo ah ganacsade, 20 sano iyo saddex safaro oo aan ku tegay dagaalka milatariga, iyo adeega gudiyada degaanka iyo gobolka oo dhan. Waxaan aaminsanahay in si qoto dheer aan ugu adeego, waxaana diirada saari doonaa sidii loo dhisi lahaa dhaqaale shaqooyin iyo fursado caawin doona dhammaan dadweynaha ku nool gobolka Maine."

Shaqada Hada: Ganacsade iyo qareen

Magaalada guriga: Sanford, Maine

Website: CoteForMaine.com

Hadafyada:

- Soo jiidashada iyo sii kordhinta shaqooyinka wanaagsan ee dhamaan qaybaha gobolka Maine.
- Yaraynta kharashka tamarta iyo anagoo ka dhigayna Maine gobol hogaamiya xaga maamulka quwada nadiifta ee korontada
- Dib u dhisida caafimaadka hoos u dhacsan loona sameeyo daryeel caafimaad dadweynaha kunool gobolka Maine.



Donna Dion

"Haddii lay doorto waxaan u adeegi doonaa dadka anigoo dhegeysanaya, fiirinaya, qiimeynaya iyo fahamka walaacooda, laakiin badankoodu ay yihiin shaqsiyo adag oo xajistan karaxukunada, qiimaha iyo waxa ay aaminsan yihiin iyo inta ugu badan ee la kordhiyo ilaalinta ixtiraamaan inta lagu jiro nidaam xalinta dhibaatooyinka."

Shaqada Hada: Hawlgab

Magaalada guriga: Biddeford, Maine

Website: DJDion4Gov2018.com

Hadafyada:

- In lays wada ixtiraam khaasatan marka laga wada hadlayo wada hadalo gorgortanka si hal weji laysku raaco
- Tababaro waxbarashada / shaqaale xoogan oo loo marayo deeqaha federaalka iyo gobolka
- Kobcin dhaqaale oo lagu dhisayo ganacsiyada hada jira iyo isku xirnaanta layliyada kulliyadaha iyo barnaamijyada tababarka xirfadaha

★ Gudoomiyaha Gobolka

★ Musharaxiinta Dimuqraadiga



Xulashada doorashada codaynta



Mark Dion

“Hogaankaygu wuxuu ku salaysan yahay mabaadi’da kalsoonida iyo sharafta. Hogaamiye waa in uu aqoonsado in ereygiisu ay yihiin damaanadkiisa iyo in dabeecadiisu ay u baahan tahay in ay la socoto hadaladiisa. Kalsoonidu waxay ubaahantahay saadaalin iyo is-waafajin. Taasi waa aasaaska anshaxa ee lagu dhisayo iskaashiga ka dhexeeya daneeyayaasha kala duwan.”

Shaqada Hada: Senetarka Gobolka iyo Qareen

Magaalada guriga: Portland, Maine

Website: DionForGovernor.com

Hadafyada:

- Dib u soo celinta iskaashiga u dhaxeeya Gudoomiyaha iyo Sharci dejiyayaasha si kor loogu qaado danaha dadka Maine.
- Samaynta nidaam daryeel caafimaad oo ku salaysan bulshada, iyada oo la xadidayo kharashyada iyo adeegyada ay bixiyaan cusbitaaladu.
- In la dhiso nidaamka waxbarashada sare ee horudhaca ah, ka hor inta aan la gaadhin waxbarashada sare, iyadoo leh maalgelin ku filan heerarka oo dhan.



Mark Eves

“Waxaan ka bilaabay xirfadayda dhakhtarka qoyska. Ka dib waxaan noqday sharci-dajiye waxaana noqday guddoomiyaha golaha sharci dejiyayaasha. Danta xooga leh waxay xakamaynaysa xukuumadeena. Maine waxay u baahan tahay guddoomiye u taagan horumarka gobolka. Taasna waxaan u sameeyey xirfadeyda oo dhan. Waan samayn doonaa guddoomiye ahaan.”

